# Tilmaamaha Waalidka ee Nidaamka Oggolaanshaha, Qiimaynta iyo Eryida

Febraayo 2021



Link to The Legal Framework

Link to TEA Special Education

**Copyright © 2021. Hay'ada Waxbarashada Texas. Xuquuqda Dhan waa la Xifdiyey.**

**Tusmada Qoraalka**

Hordhac ........ 1
Wax ka Qabadka Caruurnimada Hore ........ 3
Kaalmada Ilmaha Da'da Waxbarashada ah ........ 3
Jawaabta Waxkaqabadka ........ 4
Gudbinta Qiimaynta Hore ........ 4
Wargelinta Hore Ee Qoran ........ 5
Ogolaanshaha Waalidka ........ 5
Nidaamyadaa Qiimaynta ........ 6
Kulamada Gudida Ogolaanshaha, Qiimaynta, iyo Eryida ........ 7
Xaq-u-lahaanshaha ........ 8
Bilawga Bixinta Adeegyada ........ 10
Barnaamijka Waxbarashada Khaas Ahaaneed ........ 10
Heerarka Xaadikr Ah Guusha Tacliineed Iyo Waxqabadka Shaqayneed ........ 11
Yoolalka Sanadkii ........ 11
Waxbarashada Khaaska ah, Adeegyada La Xiriira, iyo Gargaarka Dheeraadka ah iyo Adeegyada ........ 11
Qiimaynaha Gobolka ........ 12
Kala-guurka ........ 12
Ardayda Wayn ........ 14
Caruurta Qabta Otisamka ........ 14
Caruurta Dhagaha La' ama Dhagaha Culus ........ 15
Caruurta Indhaha La' ama Aragtoodu Liito ........ 15
Qorshaha Wax-Ka-Qabadka Habdhaqanka (BIP) ........ 15
Adeegyada Sanad Dugsiyeedka la Dheereeyey ........ 15
Meelaynta ........ 16
Go'aanka Gudida ARD ........ 16
Nuqulka IEP ........ 17
Eegitaanka IEP-ga ........ 17
Dib u qiimayn ........ 18
Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan (IEE) ........ 19
Ka Noqosho Oggolaanshaha Adeegyada ........ 19
Qalinjabinta ........ 19
Anshax Marinta ........ 21
Dhagaysiga Hannaanka Xaqsoorka ee la Dedejiyey ........ 23
Xalinta Muranka ........ 23
Kaalmo Dheeraad ah ........ 24

## Hordhac

Tilmaamahan waxaa sameeyay hogaanka gobolka oo dhan ee kooxda mashruuca Nidaamka Shaqo ee Sharciga ah iyo Hay'ada Waxbarashada Texas (Texas Education Agency, **TEA**) iyada oo lagaga jawaabayo shuruudaha Xeerka Waxbarashada Texas §26.0081. Tilmaamahani waxa uu ku siinayaa adiga, waalid ahaan haysta ilmo u qalma ama ay dhici karto inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, inaad si wanaagsan u fahamto nidaamka waxbarashada gaarka ah iyo xuquuqdaada iyo waajibaadyadaada nidaamka si markaa aad u awoodo inaad si buuxda uga qayb gasho nidaamka go'aan gaadhista ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga.

Sharciga Waxbarashada Qofka Laxaadka la' (The Individuals with Disabilities Education Act, **IDEA**) ee 2004 waa sharciga federaalka ee lagu maamulo nidaamka waxbarashada gaarka ah. Mid kamid ah ujeedooyinka guud ee IDEA waa in lagu xaqiijiyo in caruurta laxaadka la' loo diyaariyo waxbarashada dadwaynaha oo munaasab ah oo bilaash ah (free appropriate public education, **FAPE**) taas oo diirada lagu saarayo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loogu talo galay in lagu buuxiyo baahiyahooga gaarka ah looguna diyaariyo waxbarashada dheeraadka ah, shaqaalaha, iyo nolosha madaxa banaan. *Waxbarashada gaarka ah* waxay ka dhigan tahay tilmaamo si gaar ah loo sameeyay si loo buuxiyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha laxaadka la'. *Adeegyada la xiriira waa* adeegyada gaarka ah ee loogu baahan yahay in lagu taageero waxbarashada gaarka ah ee ardayda si ay markaa hormar uga gaadhi karaan yoolashooda waxbarashada iyo shaqada. Adeegyada la xiriira waxaa kamid noqon kara adeegyada sida daawaynta shaqada, daawaynta jirka, daawaynta hadalka-luuqada, adeegyada la talinta, adeegyada macluumaadka hordhaca ah iyo dhaqdhaqaaqa, iyo/ama adeegyada gaadiidka.

IDEA, waalidka waxay si wayn uga qayb galayaan marxalad kasta oo nidaamka waxbarashada gaarka ah. Tilmaamahani waxa uu sharaxayaa hawlo kala duwan oo qabsoomi kara inta uu nidaamku socdo. Si aad si wanaagsan ugu fahanto xuquuqda uu ku siiyay IDEA, dugsiga waxaa looga baahan yahay inuu ku siiyo nuqul ah dokumentiga loo yaqaan *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta* ee wakhtiyada qaar nidaamka waxbarashada gaarka ah. Dokumentiga waa in lagu siiyaa ugu yaraan hal mar sanadkii iyo marka wax kamid ah xaaladaha soo socdaa ay dhacaan:

- Marka lasoo gudbiyo ama aad dalbato qiimaynta hore ee ilmahaaga;
- Marka aad hesho cabashada gobolka ee kowaad sanad dugsiyeedka;
- Marka aad dalbato dalabka kowaad ee dhagaysiga hannaanka xaqsoorka sanad dugsiyeedka;
- Maalinta go'aan la gaadho si isbadal anshax marin ah oo meelaynta ah loo sameeyo; iyo
- Marka aad dalbato.

Texas, u qalmidda ilmaha ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha iyo inta badan go'aamada ugu waawayn ee barnaamijka waxbarashada gaarka ah waxaa gaadha gudida oggolaanshaha, qiimaynta, iyo eryida (admission, review, and dismissal, **ARD**). Waxa aad sidoo kale maqashay kooxdan oo loogu yeedho kooxda barnaamijka waxbarashada la gaar yeeley (individualized education program, **IEP**), taasi oo ah tibaaxda uu adeegsaday sharci federaalku. Gudida ARD waxa loo sameeyay ilmahaaga, waxa aad ka noqon doontaa xubin gudidaas.

Tilmaamahani waxa uu isbadalayaa mudo kadib marka ay yimaadaan isbadalo shuruudaha federaalka iyo gobolka ee waxbarashada gaarka ah. Nuqul elektoroonig ah oo la daabici karo ayaa laga heli karaa websaytka Xarunta Adeega Waxbarashada Deegaanka 18 ee Nidaamka Shaqo ee Sharciga ee Nidaamka Waxbarashada Gaarka ah ee Ilmaha Ku Xeeran fw.escapps.net.

Waxaa jira taariikho badan iyo wakhtiyo badan oo ay ku eeg tahay nidaamka waxbarashada gaarka ahi. Daabacaadan, taariikhahaas muhiimka ah iyo wakhtiyada ay ku eeg tahay ayaa lagu sharaxay. Sidoo kale, dokumenti kale oo la socda oo onlayn ah ayaa la heli karaa kaasi oo kaa caawinaya jawaab u helidda su'aalaha aad ka qabto wakhtiyada qiimaynta, wargelinta qoran ee hore, kala-guurka, qiimaynta IEP, iyo nuxurada kale ee muhiimka ah. *Geedka Go'aanka Wakhtiga (Timeline Decision Tree)* waxaa laga heli karaa halkan http://fw.escapps.net/display/Webforms/ESC18-FW-Documents.aspx?DT=G&LID=en.

## TILMAAMAHA WAALIDKA EE NIDAAMKA OGGOLAANSHAHA, QIIMAYNTA IYO ERYIDA

### Wax ka Qabadka Caruurnimada Hore

Waxaa loo heli karaa kaalmo qoysaska leh caruur yaryar iyo caruur socod barad ah oo yeeshay dib u dhac korniin. Hay'ada Texas ee bixisa adeegyada waxka qabadka wakhtiga hore waa Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha Texas. Barnaamijka caruurta aadka u yaryar waa barnaamijka Waxkaqabadka Caruurnimada Hore (Early Childhood Intervention, **ECI**). Adeegyadan waxaa loogu talo galay caruurta ka yar da'da sadex sano jirka.

Da'da sadex jirka, caruurta qabta laxaad la'aanta waxay u qalmi karaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. Hadii ay sidaa tahay, degmo dugsiga ilmaha ayaa ka masuul ah xaqiijinta FAPE inuu heli karo ilmuhu laga bilaabo sanadguurada dhalashada sadexaad ee ilmaha. Dhamaan caruurta qaadata adeegyada ECI uma wada qalanto adeegyada ay bixiyaan dugsiyada dadwaynuhu. Markaa, ugu yaraan 90 maalmood kahor inta ilmaha hela adeegyada ECI aanu gaadhin sadex sano jir, waxaa la qaban doonaa balan kulan si looga caawiyo qoyska inay ka wareegaan adeegyada ECI una wareegaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, hadii ay munaasab tahay. Hadii uu ilmuhu u qalmo, waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha waa in loo diyaariyaa ilmaha marka uu taagan yahay sanad-guurada sadexaad ee dhalashadiisa. *Wixii ka baxsan ECI* waa qoraal uu la socdo macluumaad ku saabsan ka wareegidda barnaamijka waxbarashada hore iyo u wareegidda waxbarashada gaarka ah. Macluumaadkan waxaa laga heli karaa https://www.navigatelifetexas.org/uploads/files/general-files/Beyond-ECI-ECI-17_1117.pdf.

### Kaalmada Ilmaha Da'da Waxbarashada ah

Hadii aad qabto walaac ku saabsan waxbarashada ama habdhaqanka ilmahaaga gaadhay da'da dugsiga, talaabada kowaad ee aad qaadaysaa waa inaad la hadasho macalinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga oo aad kala hadasho wixii ku saabsan walaacyadaada. Hadii talaabadan kowaad aad ku guulaysan waydo, waxa aad shaqaalaha dugsiga ka dalban kartaa inay kuu gudbiyaan koox taageerada ardayda dugsiga ah, kuwaas oo ah koox macalimiin ah iyo shaqaale kale oo si joogto ah u kulma si ay uga jawaabaan wixii walaacyo waxbarasho ama habdhaqan ah ee caruurtu ay qabaan.

Ardayda ay ku adag tahay waxbarashada guud ee fasalka dhaxdiisu waxa loo tixgelin karaa adeegyada taageerada marka kowaad ama loo gudbiyo qiimaynta waxbarashada gaarka ah ee hoos timaada IDEA iyada oo waafaqsan helitaanka adeegyada taageerada. Hadii ardayga uu kusii adkaato fasalka waxbarashada guud isaga oo la siinayo adeegyada taageerada ama baahida ardayga aan lagaga jawaabi karin kaliya bixinta adeegyada taageerada, dugsigu waa inuu ardayga u gudbiyaa qiimayn shakhsi ahaaneed oo buuxda oo la bilaabaa sida uu dhigayo IDEA. Ardayga loogama baahna in la siiyo taageero mudo gaar ah kahor u gudbinta qiimaynta shakhsi ahaaneed ee buuxda ee hore. Gudbinta qiimaynta buuxda ee shakhsi ahaahneed ee hordhaca ah waxaa uu samayn kartaa dugsigu wakhti kasta oo waxaa qaban kara shaqaalaha dugsiga, waalidka ardayga ama koriyaha sharciga ah ama qof kale oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ardayga. Ogow in hadii shaqaalaha dugsigu ay ka shakiyaan in ilmuhu uu laxaad la' yahay oo uu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, waa inay markaa u gudbiyaan qiimaynta shakhsi ahaaneed ee buuxda ee hore.

## Jawaabta Waxkaqabadka

Sharciga federaalku waxa uu farayaa dugsiyada inay diirada saaraan caawimaada dhamaan caruurta inay waxbartaan iyada oo laga jawaabayo mushkiladaha xilli hore. Ka Jawaabida Waxkaqabadka (Response to Intervention, **RtI**) waa dariiq ay dugsiyo badan isticmaalaan si ay u ogaadaan oo ay uga caawiyaan caruurta ugu jirta khatar inayna buuxin shuruudaha heerka fasalka. Qaybaha aasaasiga ah ee qaabka RtI waa: bixinta waxbaris iyo waxkaqabadyo saynis ah, oo cilmi-baaris ku salaysan fasalka waxbarashada guud; la socodka iyo cabiridda hormarka ilmaha marka la eego jawaabta waxkaqabadka; iyo isticmaalka cabiradan hormarka si loo gaadho go'aano waxbarasho.

Qaabka Rtl waxa uu kamid yahay nidamyo badan oo taageero **(MTSS)** taas oo heer ama qayb kastaa ay leedahay heer waxka qabad oo kasii badan kii hore. Waxkaqabadyada la siiyo ilmaha waxaa lagu samayn doonaa habayn taas oo ku salaysan hormarka la socodka ilaa inta ilmuhu si wanaagsan u soconayo. Caruurta aan kaga jawaabin waxkaqabadka wakhti macquul ah gudihii, sida daraasaduhu sheegayaan, waxaa loo gudbin doonaa waxkaqabadyo aad u sareeya. Badanaa, dugsigaagu waxa uu hayaa macluumaad ku filan lix todobaad oo waxka qabad kadib si go’aan looga gaadho talaabada xigta (sida, waxka qabadka sii socda, waxka qabad sare, u gudbinta qiimaynta). Mudada go’aan gaadhidu waxay ku xidhan tahay inta jeer/mudada waxka qabadka iyo xirfadaha bartilmaameedka ah.

Ilmaha looma baaha inuu hormar ka sameeyo qayb kasta oo ku jira nidaamka RtI kahor inta aan loo gudbin waxbarashada gaarka ah. Marka ay cadaato in waxkaqabadka waxbarashada guud ayna ku filnayn, shaqaalaha dugsigu waa inay ka shakiyaan in ilmuhu uu qabo laxaad la'aan oo markaa waa in sida ugu dhakhasaha badan loo gudbiyo. Waxyaabaha muhiimka ah ee ku aaddan go’aaminta hadii waxka qabadka waxbarashada guud ay ku filan tahay waxaa kamid ah qiimaynta taariikhda waxka qabadka iyo macluumaadka la socodka hormarka ardayga (xadiga hormarka wakhtigan iyo u socodka dhanka buuxinta gaabista ku aaddan guusha). Waalidka ayaa sidoo kale dalban kara gudbin wakhti kasta iyada oo aan la eegeynin hadii ilmuhu uu qaato waxkaqabadyo uu ku helo nidaamka RtI. Khidadaha Rtl waxaa dhici karta in aan loo isticmaalin si dib loogu dhigo ama loo diido wakhtiga qiimaynta ilmaha looga shakiyay inuu qabo laxaad la’aan sida ay dhigayso IDEA.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka RtI waxaa laga heli karaa [https://tea.texas.gov/Academics/Special_Student_Populations/Special_Education_SPED/Programs_and_Services/Response_to_Intervention](https://tea.texas.gov/Academics/Special_Student_Populations/Special_Education_SPED/Programs_and_Services/Response_to_Intervention).

## Gudbinta Qiimaynta Hore

Dugsiga waxaa saaran masuuliyad ah inuu u qaado ogolaanshaha si uu u bilaabo qiimaynta hore ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhti kasta oo laga shakiyo in ilmuhu uu qabo laxaad la'aan oo uu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegya la xidhiidhka ee IDEA. Waxa aad sidoo kale dalban kartaa qiimaynta hore ee ilmahaaga wakhti kasta.

Hadii aad dalab qoraal ah u dirto agaasimaha hay'ada waxbarashada deegaanka (local educational agency’s, **LEA’s**) ee adeegyada waxbarashada gaarka ah ama shaqaalaha maamulka degmada u qalanka waxbarashada gaarka ah inay bilaabaan qiimaynta hore, dugsigu waa inuu, waxaan ka danbaynin maalinta 15aad ee dugsiga kadib taariikhda marka uu helo dugsigu dalabka, waa inuu mid ahaan ku siiyaa: 1) wargelin qoraal ah oo hore ee qaabka uu ku talinayo in qiimaynta loo sameeyo, nuqul ah *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta*, iyo fursada bixinta ogolaanshaha qoraalka ah ee qiimaynta; ama 2)

wargelinta qoraalka ah ee hore ee diidmadiisa qiimaynta ilmahaaga iyo nuqul ah *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta*.

Fadlan ogsoonow in dalabka qiimaynta waxbarashada gaarka ah lagu samayn karo afka oo ayna u baahnayn inay qoraal ahaato. Degmada dugsiyada iyo kuwa caqdigu waa inay wali u hogaansamaan dhammaan shuruudaha wargelinta federaalka iyo shuruudaha aqoonsiga, helitaanka, iyo qiimaynta ilmaha looga shakiyo inuu laxaad la' yahay oo u baahan yahay waxbarasho gaar ah. Ma jirto wakhti gaar ah oo ay waajib tahay in laga jawaabo dalabyada afka, laakiin dugsiyada waxaa lagu dhiiri geliyaa inay raacaan mudada 15 maalmood dugsi ee sare ku xusan.

### Wargelinta Hore Ee Qoran

Mid kamid ah xuquuqdaada IDEA ay ku siinaysaa waa wargelin qoraal oo hore oo ku saabsan qaadista ama qaadis la'aanta tallaabada ku saabsan ilmahaaga wakhti wakhti macquul ah kahor inta aanu dugsigu qaadin ama diidnin qaadida talaabada. Gaar ahaan, dugsiga waa inuu kugu siiyo wargelin qoraal ah oo hore luuqadaada hooyo ama qaabka kale oo loo xiriiro marka uu:

- Ku taliyo bilaabidda ama badalida aqoonsiga, qiimaynta, barnaamijka waxbarasho, ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga ama siinta FAPE ilmahaaga (oo ay ku jiraan isbadalka uu keeney ka noqoshadaada ogolaanshaha sii socoshada siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira); ama
- Diido bilaabidda ama badalida aqoonsiga, qiimaynta, barnaamijka waxbarasho, ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga ama siinta FAPE ee ilmahaaga.

Wargelinta qoraalka ah ee hore waa in lagu siiyaa ugu yaraan shan maalmood oo waxbarasho kahor talaabooyinka dugsigu ku taliyay ama la diiday inuu qaado, iyada oo aad ogolaato mudo ka gaaban moojee. Dugsigu waa inuu bixiyaa wargelin qoraal ah adigu oo hore iyadoon la eegayn hadii aad ogolaatay ama dalbatay badalka.

Wargelinta hore ee qoraalka ah waa inay la socdaan macluumaadka soo socdaa.

(1) Sharaxa ficilka uu ku taliyay ama uu diiday dugsigu;
(2) Sharaxa sababta dugsigu u samaynayo ama u diidayo qaadida ficilka;
(3) Sharaxa nidaam kasta oo qiimayn, nidaam, duwaan, ama warbixinta dugsiga ee laga duulay markii ficilka lagu talinayay ama la diidayay;
(4) Bayaanka in waalidka ilmuhu uu qabo laxaad la'aan la ilaaliyay sida ay dhigayaan nidaamka ilaalinta ee qaybtan iyo, hadii wargelintan ayna ahayn u gudbinta hore qiimaynta, taas oo ah qaabka nuqulka sharaxa ilaalinta nidaamka lagu heli karo;
(5) Ilaha ay waalidku la xidhiidhayaan si looga caawiyo inay fahmaan shuruudaha waxbarashada gaarka ah;
(6) Sharaxa ikhtiyaarada kale ee gudida ARD ay eegeen iyo sababaha ikhtiyaaradaas loo diiday; iyo
(7) Sharaxa xaaladaha kale ee la xidhiidha waxa dugsigu ku taliyay ama diiday.

### Ogolaanshaha Waalidka

Waxaa jira hawlaha qaar nidaamka waxbarashada gaarka ah oo aan dhacaynin iyada oo dugsigu uu helo ogolaansho moojee. Dugsigu waa inuu si buuxda kuugu wargeliyaa dhamaan macluumaadka loo baahan yahay si uu u gaadhi karo go'aan wanaagsan, oo ay ku jiraan sharaxa hawsha lagu taliyay.

Macluumaadku waa inuu ku qornaadaa luuqadaada hooyo ama qaab kale oo xiriir, iyada oo ayna macquul ahayn in lagu bixiyo macluumaadka qaabkani moojee. Hadii ay jiraan duwaano ay tahay in la bixiyo, dugsigu waa inuu qoraa liiska duwaanada iyo cida la siinayo.

Marka aad ogolaansho bixiso, waxa ay ka dhigan tahay inaad fahantay oo aad ogolaatay iyada oo qoraal ah inuu dugsigu sameeyo hawsha ogolaanshahaaga loo doonayo. Waxaa muhiim ah in aad fahanto in ogolaanshuhu uu yahay ikhtiyaar oo laga noqon karo wakhti kasta kahor intayna hawshu dhicin. Laakiin, hadii aad ka noqoto ogolaanshaha hawsha, wixii hore loo qabtay lagama daba tagi karo.

Tusaalayaasha soo socda waa hawlaha u baahan ogolaanshahaaga:

- Qiimaynta ilmahaaga markii kowaad;
- Dib u qiimaynta ilmahaaga sadexdii sanoba mar, ama wax ka badan in dib loo qiimeeyo hadii macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay, oo dib u qiimaynta aad adiga iyo macalinku ilmuhu dalbataan;
- Bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira marka kowaad;
- In loo ogolaado xubin gudida ARD ah inayna ka qayb gelin kulanka gudida ARD marka kulanku ku saabsan yahay wax ka badalka ama lagaga wada hadlayo aagga xubinta ee manhajka ama adeegyada la xidhiidha; iyo
- Soo casuumida wakiilka hay'ad kasta oo ka qayb galaysa oo ay u badan tahay inay ka masuul tahay bixinta ama lacag bixinta adeegyada kala guurka labaad.

## Nidaamyadaa Qiimaynta

Hadii aad u bixiso ogolaanshe qiimayn buuxda oo shakhsi ahaaneed (**FIE**), dugsigu waa inuu bixiyaa wargelin qoraal ah oo hore oo wixii nidaam qiimayn ah ee dugsigu qabanayo ah, iyo sidoo kale nuqulka wargelinta nidaamka ilaalinta hadii ilmaha la qiimaynayo markii kowaad. Dugsigu waa inuu isticmaalaa qiimayno kala duwan iyo khidado si uu u ururiyo macluumaadka la xidhiidha ee shaqada, korniinka, iyo waxbarashada ee ilmaha, oo uu kujiro macluumaadka aad bixisay. Dugsiga ilmahaaga uma isticmaali karo wax cabiraado ah ama qiimayn ah shuruuda kaliya ee lagu go’aaminayo hadii ilmahaagu uu qabo laxaad la’aan iyo si loo go’aamiyo barnaamijka waxbarasho ee ku haboon in ilmahaaga helo. Dugsigu waa inuu qabtaa qiimaynta ilmahaaga ee dhamaan aagaga looga shakiyo laxaad la’aanta si loo go’aamiyo hadii ilmahaagu uu qabo laxaad la’aan iyo si loo go’aamiyo baahidiisa waxbarasho. Nidaamka qiimaynta ee ilmuhu waa inay:

- Ku jiraan macluumaadka ku saabsan waxbarashada ilmaha, korniinka, iyo waxqabadka shaqada;
- Bixiyaan shaqaale la tobobaray oo aqoon u lihi sida ay dhigayaan tilmaamaha soosaaraha imtixaanka ee loo bixiyo ujeedada in qiimaynuhu yihiin qaar sax ah oo lagu kalsoonaan karo;
- Waa in lagu siiyaa ilmaha luuqadiisa hooyo ama qaab kale oo xiriir iyada oo marka la eego ayna macquul u eekaan moojee; iyo
- Bilaa eex, ama loo bixiyo qaab aan ilmaha la takooraynin, iyada oo aan la eegeynin sooyaalkiisa dhaqan, qoomiyadiisa, ama laxaad la'aantiisa.

Qiimaynta hore iyo warbixinta natiijada waa in lagu dhamaystiro wax aan ka badnayn 45 maalmood oo waxbarasho oo ka bilaabma taariikhda dugsigu uu heley ogolaanshahaaga qoraalka ah. Laakiin, hadii ilmahaagu uu ka maqnaa dugsiga mudada qiimaynta sadex ama wax ka badan oo maalmood, mudada qiimaynta waa in lagu kordhiyaa maalmaha waxbarasho ee u dhigma maalmaha waxbarasho ee ilmuhu maqnaa. Dugsigu waa inuu ku siiyaa nuqul warbixinta qiimaynta ah oo bilaash ah.

Hadii uu ilmuhu ka yar yahay shan sano jir marka la joogo Sebteembar 1 ee sanadka dugsiyeedka oo aanu gelin dugsiga dadwaynaha, ama uu ku jiro dugsi gaar loo leeyahay ama guriga wax loogu dhigo iyada oo aan la eegeynin da'da, qiimaynta hore iyo warbixinta natiijada waa in lagu dhamaystiro wax aan ka dambayn maalinta 45aad ee waxbarasho oo ka bilaabanta taariikhda dugsigu uu heley ogolaanshahaaga qoraalka ah.

Waxaa jira ka reebanaan 45 maalmood ee waxbarasho ah. Hadii uu dugsigu ku helo ogolaanshahaaga qiimaynta hore ugu yaraan 35 maalmood laakiin ka yar 45 maalmood oo waxbarasho kahor maalinta ugu danbaysa ee sanad dugsiyeedka. Warbixinta qiimaynta qoran waa in la buuxiyaa oo adiga lagu siiyaa ugu danbayn Juun 30 sanadkaas. Laakiin, hadii uu ilmahaagu ka maqan yahay dugsiga sadex maalmood ama wax ka badan inta lagu jiro mudada qiimaynta, taariikhda uu ku eeg yahay ee Juun 30keena markaa ma khusayso. Laakiin, wakhtiga guud ee 45 maalmood oo waxbarasho oo lagu kordhiyay intii uu maqnaa ee sadexda ama ka badan ee maalmood ayaa la qaadanayaa.

Hadii aanad ogolaan qiimaynta hore, dugsigu waxa uu, laakiin ku waajib maaha, dalban karaa qiimaynta isaga oo adeegsanaya cid dhexdhexaad ah ama waxa uu dalbanayaa dhagaysiga hannaanka xaqsoorka. Hadii uu dugsigu go'aansado in aanu qiimaynta dalban, dugsigu kuma uu xadgudbin shuruudaha IDEA ee aqoonsiga, helitaanka, iyo qiimaynta dhamaan caruurta laxaadka la' ee u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Shuruudan waxaa loo yaqaan inay tahay mid saaran dugsiga *masuuliyad helitaanka ilmaha.*

## Kulamada Gudida Ogolaanshaha, Qiimaynta, iyo Eryida

Kadib marka qiimaynta hore la dhamaystiro, gudi ARD ah waa in la eego warbixinta oo go'aamisaa hadii ilmahaagu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Xubnaha gudida ARD waxaa kamid ah kuwa soo socda:

- Adiga, waalidka;
- Ugu yaraan hal macalin oo waxbarashada caadiga ah ee ilmaha waa inuu, marka ay macquulka tahay, noqdaa macalin ka masuul ah hirgelinta qayb kamid ah IEP-ga ilmaha;
- Ugu yaraan hal macalin oo waxbarashada gaarka ah ama bixiye u ah ilmaha;
- Wakiil ka socda dugsiga;
- Qof u turjubi kara tilmaamaha natiijada qiimaynta;
- Shakhsiyaad kale oo aqoon u leh ama khibrad gaarka ah u leh ilmaha oo aad adiga ama dugsigu soo casuumay;
- Marka ay munaasabka tahay, ilmaha;
- Ilaa inta haboon, marka aad qoraal ogolaansho ah soo gudbiso ama, kadib marka uu ilmahaagu gaadho 18 jir, iyada oo uu la socdo qoraalka ogolaanshaha ah ee ilmaha wayn, wakiilka hay'ad kasta oo ka qayb galaysa ee ay u badan tahay inay ka masuul noqoto bixinta ama bixinta kharashka adeegyada kala guurka;

- Wakiil ka socda waxbarashada mihnada iyo farsamo, kaas oo la doorbidayo inuu noqdo macalin, hadii ilmaha loo eegayo bilawga ama sii waditaanka meelaynta ee waxbarashada mihnada ama farsamada; iyo
- Xubin shaqaalaha xirfadlaha ah oo ka tirsan gudida qiimaynta ku wanaagsanida luuqada, hadii ilmaha loo aqoonsado arday barta Ingiriisiga.

Gudida ARD waxa sidoo kale kamid ah, marka ay munaasab tahay:

- Macalin haysta shahaadada wax u dhiga ardayda dhagaha la' ama dhagaha culus, hadii ilmaha looga shakiyo wakhtigan inuu qabo ama la xaqiijiyay inuu qabo dhago la'aan ama dhaga culays;
- Macalin shahaado ku haysta waxbarashada ardayda qabta indha la'aanta, hadii ilmaha looga shakiyay ama la xaqiijiyay inuu qabo indho la'aan; ama
- Macalin shahaado ku haysta waxbarashada ardayda qabta indho la'aanta iyo macalin shahaado ku haysta waxbarashada ardayda qabta dhaga la'aanta ama dhagaha culus, hadii ilmaha looga shakiyo ama la xaqiijiyo inuu qabo dhago la'aan iyo indho la'aan.

Dugsigu waa inuu kugu soo casuumaa kulan kasta oo gudida ARD u qabtaan ilmahaaga oo uu dadaal u galaa sidii loo xaqiijin lahaa ka qayb galka hal ama labada waalid. Wargelinta qoraalka ah ee kulanka waa in lagu siiyaa dugsiga shan maalmood oo waxbarasho kahor kulanka, iyada oo mudo ka gaaban lagu heshiiyo moojee. Wargelinta qoraalka ah waxaa kamid ah ujeedada, wakhtiga, goobta kulanka, iyo liiska dadka ka qayb galaya kulanka. Hadii aanad ku hadli karin Ingiriisi, dugsigu waa inuu wargelinta kugu siiyaa luuqadaada, iyada oo ayna macquul ahayn in taas la sameeyaa moojee. Hadii luuqadaada hooyo ayna lahayn qoraal, dugsigu waa inuu qaadaa talaabo uu ku xaqiijinayo in wargelinta hadal ahaan laguugu turjubo ama qaab kale oo aad ku fahmi karto wargelinta.

Kulanka gudida ARD waa inuu ku dhacaa wakhti iyo goob adiga iyo dugsigaba idiin haboon. Hadii taariikhda ama wakhtiga dugsigu ku taliyay adiga aanu kuu haboonayn, dugsigu waa inuu dadaal macquul ah geliyaa sidii uu kuugu heli lahaa wakhti aad kulanka iman karo. Hadii ayna labada waalid midna ayna kasoo qayb gali karin kulanka, waxa aad kaga qayb gali kartaan taleefan ama shir maqal iyo muuqaalka ah. Hadii aanu dugsigu kugu qancin inaad kasoo qayb gasho kulanka, markaa dugsiga ayaa kulanka qaban la'aantaa.

Xubinta gudida ARD ayaa laga dhaafi karaa inay ka qayb gasho kulanka qayb kamid ah ama dhamaan kulanka gudida ARD marka qofka ka qayb galkiisa aanu daruuri ahayn maadaama oo aaga shakhsiga ee manhajka ama adeegyada la xiriiraa aan waxba laga bedelayn ama lagaga wada hadlayn kulanka. Waa inaad qoraal ahaan ku ogolaataa in qofkaas laga fasaxo ka qayb galka.

Xubin gudida ARD ah ayaa laga dhaafi karaa ka qayb galka kulanka gudida ARD marka kulanku ku salaysan yahay wax ka badalka, ama lagaga wada hadlayo, aaga manhajka ee xubinta ama adeegyada la xiriira hadii adiga iyo dugsigu aad ku ogolaataan qoraal in qofka laga dhaafo oo qofka laga dhaafayna uu ku soo gudbiyo qoraal aragtidiisa kaga dhiibanayo samaynta IEP-ga kahor kulanka.

## Xaq-u-lahaanshaha

Waxaa jira laba qaybood imtixaan ah oo lagu go'aamiyo hadii ilmaha uu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira: (1) ilmahaagu waa inuu qabaa laxaad la'aan; iyo (2) laxaad la'aantaas darteed, ilmahaagu waa inuu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira si uu

waxbarashada uga faa'ido. Si uu u buuxiyo shuruudaha u qalanka imtixaanka labada qaybood ah qaybta kowaad, ilmaha u dhexeeya da'da 3 ilaa 21, marka laga tago kuwa lagu sheegey qawska ee hoose, waa inuu buuxiyaa shuruudaha hal ama wax ka badan oo qaybaha laxaad la'aanta ah ee hoos ku qoran:

- Otisam;
- Dhago la'aan ama dhago cuslaan (dhalasho ilaa 21 jir da'da ah);
- Dhago la'aan-indho la'aan (dhalasho ilaa 21 jir da'da ah);
- Khalkhal dareen;
- Naafonimada caqliga;
- Naafonimo badan;
- Qaybo aan la garanaynin oo caruurnimada hore ah (da'da sadex ilaa shan);
- Liidasho lafaha ah;
- Liidasho kale oo caafimaad;
- Naafonimo waxbarashada gaarka ah;
- Liidasho hadalka ama luuqadda;
- Dhaawaca maskaxda oo jug keentay; ama
- Liidashada aragga (dhalasho ilaa 21 jir da'da ah).

Gudida ARD waa inay go'aamisaa u qalanka 30 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda warbixinta qiimaynta hore la dhamaystiray. Hadii maalinta 30aad ay ku soo beeganto xagaaga oo aanu dugsigu shaqaynayn, gudida ARD waxa ay haystaan ilaa maalinta kowaad ee fasalka bilaabmayo ee dayrta inay kusoo gunaanadaan go'aanka ku saabsan go'aaminta u qalanka hore, IEP, iyo meelaynta iyada oo qiimaynta hore muujinayso inuu ilmuhu u baahan yahay sanad dugsiyeed oo la kordhiyo (extended school year, **ESY**) adeegyada ah xagaagaas moojee.

Hadii, laakiin, dugsigu ay soo gaadho ogolaanshahaaga qiimaynta hore marka la joogo ugu yaraan 35 laakiin ka yar 45 maalmood oo waxbarasho kahor maalinta ugu danbaysay ee wax dhigista sanad dugsiyeedka oo ilmahaagu uuna maqnaan sadex maalmood ama wax ka badan inta u dhaxaysa wakhtiga aad ogolaanshahaaga bixisay iyo maalinta ugu danbaysa ee waxbarasho (sida, shuruudaha oo la buuxiyo si loo helo warbixinta qiimaynta ugu dambayn Juun 30keeda), gudida ARD waa inay kulmaan ugu dambayn maalinta 15aad ee waxbarasho sanad dugsiyeedka xiga si ay u eegaan warbixinta qiimaynta, iyada oo qiimayntu muujinayso in ilmuhu u baahan yahay adeegyada ESY moojee inta lagu jiro xagaagaas. Hadii qiimayntu muujinaso in ilmahaagu u baahan yahay adeegyada ESY, gudida ARD waa inay yeeshaan kulan aan caadi ahayn ilaa inta macquulka ah si ay u eegaan qiimaynta ilmaha.

Dhamaan ardayda ay waxbarashadu ku adag tahay uma qalmaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. Hadii mushkilada ilmahaagu ay tahay waxbaros la'aan ku saabsan akhriska ama xisaabta ama maadaama oo ilmahaagu aanu Ingiriisiga si wanaagsan u aqoonin, ilmahaaga in aan loo arag inuu yahay ilme qaba laxaad la'aan sida ay dhigayaan IDEA. Hadii ay qiimayntu muujinayso in ilmahaagu aanu lahayn laxaad la'aan, kooxda taageerada xarunta ku salaysan ayaa kulmi karta oo waxa ay ku talin kartaa adeegyo ama barnaamijyo kale oo waxbarashada guud ah oo ilmahaaga caawinaya.

Hadii ay qiimayntu muujinayso in ilmahaagu uu laxaad la' yahay, gudida ARD waa inay markaa kaga jawaabtaa qaybta labaad ee u qalanka imtixaanka labada qaybood ah iyada oo go'aaminaysa hadii ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira si uu uga qaybgalo oo uu hormar uga gaadho manhajka waxbarashada guud (sida, isla manhajka caruurta aan laxaadka la'ayn).

## Bilawga Bixinta Adeegyada

Hadii uu ilmahaagu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsiga waxaa looga baahan yahay inuu ku siiyo ilmahaaga FAPE deegaanka ugu xadidaada yar. Tan waxaa lagu gaaraa samaynta gudida ARD ee IEP iyo hirgelinta dugsiga ee IEP. Kahor inta aanu dugsigu bixin karin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, waa inay ogolaanshahaaga adeegyada kaa qaadaa. Dugsigu waa inuu dadaal macquul ah u galaa helitaanka ogolaanshahaaga bilaabida adeegyada ee hore. Hadii aanad ogolaanin bilaabida adeegyada ee hore, dugsigu waxaa dhici karta in aanu dalban cid dhexdhexaadin ah ama dalban dhagaysiga hannaanka xaqsoorka oo badalaya diidmadaada ogolaanshaha adeegyada. Waxbarasho gaarka ah iyo adeegyada la xiriira lama bixin doono hadii aad diido ogolaanshaha. Dugsigu kuma uu xad gudbin masuuliyadiisa inuu u diyaariyo FAPE ilmahaaga hadii aad diido ogolaanshaha ama aad ka jawaabi waaydo dalabka ogolaansho bixinta ee bilawga siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

## Barnaamijka Waxbarashada Khaas Ahaaneed

Qaybaha waawayn ee IEP waxaa kamid ah:

- Heerarka wakhti xaadirka ilmahaaga ee guusha tacliineed iyo waxqabadka shaqayneed (**PLAAFP**);
- Yoolalka sanadkii ee la cabiri karo, oo waxaa kamid ah yoolasha waxbarasho iyo shaqo;
- Qeexdimaha waxbarashada khaaska ah, adeegyada la xiriira, iyo gargaarka dheeraadka ah iyo adeegyada ee la bixin doono;
- Macluumaadka ku saabsan sida ilmahaagu uu uga qayb galayo qiimaynta gobolka iyo degmada oo dhan, oo waxaa kamid ah bayaanka qaabilaada shakhsiga ku haboon ee daruuriga u ah ilmahaaga si uu qiimaynta u galo, iyo hadii ilmahaagu u baahan yahay inuu galo qiimayn kale, halkii qiimaynta Gobolka oo Dhan ee caadiga ah lagaga samayn lahaa, iyo sababta qiimaynta kale ay ugu haboon tahay ilmaha;
- Adeegyada kala guurka, marka ay da'da ku munaasab tahay; iyo
- Aagaga kale oo ay tahay in la eego, oo hadii loo baahdo looga jawaabo caruurta qaba laxaad la'aanta, baahiyaha, ama xaaladaha qaar.

TEA waxay samaysay foom IEP oo laga heli karo

https://tea.texas.gov/Academics/Special_Student_Populations/Special_Education_SPED/Programs_and_Services/IEP_Model_Form. Dugsiga ilmahaaga ayaa isticmaali kara foomkan ama waxa uu isticmaali karaa foom kale.

Marka la samaynayo IEP, waxaa jira dhawr shay oo gudida ARD ay tahay inay eegto, oo ay ku jiraan:

- Waxa uu ilmahaagu ku wanaagsan yahay;
- Walaacyadaada kordhinta waxbarashada ilmaha;
- Natiijooyinka qiimaynta ugu danbaysay ee ilmahaaga; iyo
- Baahiyaha waxbarashada, korniinka, iyo shaqada ee ilmahaaga.

Sidoo kale, gudida ARD waa inay ka jawaabtaa xaaladaha gaarka ah ee caruurta qaar, sida soo socota:

- Waxa aad isla eegtaan inaad isticmaashaan waxkaqabadka habdhaqanka wanaagsan iyo taageerada iyo khidado kale oo lagaga jawaabayo habdhaqankaas marka uu habdhaqanka ilmuhu uu caqabad ku ah waxbarashada ilmaha ama dad kale tooda;
- Waxa aad isla eegtaan baahiyaha luuqada ilmaha maadaama baahiyahan ay la xiriiraan IEP ilmaha marka ilmuhu u qalmo maadaama uu yahay ilmo aan Ingiriisigiisu wanaagsanyn; wax ugu dhigista farta indhoolaha, iyada oo gudidu go'aamiso moojee in waxbarashada lagu dhigayo ama isticmaalka farta indhoolku ayna ku haboonayn moojee ilmaha marka uu indho la' yahay ama aanu si wanaagsan waxba u arag;
- Waxa aad isla eegtaan baahiyaha xiriirka ee ilmaha kasta oo naafo ah, iyo ilmaha dhagaha la' ama dhago culus, eeg baahiyaha luuqadda iyo xiriirka ilmaha, fursadaha in uu la sheekeysto lodkiisa iyo dadka aqoonta u leh luuqadda ilmaha iyo qaabka xidhiidhka, heerka waxbarasho, iyo baaxada baahiyaha oo dhan, oo ay kamid tahay fursadaha waxbarista tooska ah ee ilmaha lagu siinayo luuqaddiisa iyo qaabkiisa xidhiidhka; iyo
- Waxa aad eegtaa hadii ilmo kasta oo naafo ah uu u baahan yahay aaladaha teknooloojiyada kaalmada iyo adeegyada.

### Heerarka Xaadikr Ah Guusha Tacliineed Iyo Waxqabadka Shaqayneed

IEP waa inay la socotaa bayaan ah PLAAFP -ga ilmahaaga. Bayaankaas waa inuu la socdaa sida laxaad la'aantu u saamaynayso kaqaybgalka iyo hormarka manhajka guud. Hadii uu ilmahaagu uu ku jiro waxbarashada dugsiga kahor, bayaanku waa inuu sharaxayo sida laxaad la'aanta u saamaynayso ka qayb galkiisa hawlaha da'da ku haboon.

### Yoolalka Sanadkii

IEP waa inay ku jiraan yoolal la cabiri karo, oo ay ku jiraan yoolashada waxbarasho iyo shaqo, oo lagu buuxinayo baahiyaha ilmaha ay keentay laxaad la'aanta si markaa isaga ama iyadu ay uga qayb gali karto oo hormar uga gaari karto manhajka guud. Yoolashan waa in ay sidoo kale ka jawaabaan baahiyaha kale ee waxbarasho ee ka yimaada naafonimada ilmahaaga. IEP waa inay sharaxdaa sida uu hormarka ilmahaaga ee ku aaddan yoolasha sanadkii loo cabiri doono iyo sidoo kale marka warbixinta hormarka lagu siin doono.

### Waxbarashada Khaaska ah, Adeegyada La Xiriira, iyo Gargaarka Dheeraadka ah iyo Adeegyada

Gudida ARD waxa ay go'aamiyaan nooca adeegyada loo baahan yahay si:

- Ay awood ugu siiyaan ilmaha inuu sameeyo hormarka munaasabka ah ee gaaridda yoolasha sanadkii;
- Uu ugu lug yeesho oo hormar uga sameeyo manhajka guud oo ay ku jiraan ka qayb galka hawlaha ka baxsan waxbarashada iyo wixii aan waxbarasho ahayn; iyo
- uu wax u barto oo ugala qayb galo caruurta aan laxaadka la'ayn.

IEP waa inay ku jiraan bayaanka waxbarashada gaarka ah ee loo baahan yahay, adeegyada la xiriira, iyo kaalmada dheeraadka ah iyo adeegyada ee la siinayo ilmahaaga ama ilmahaaga lagu matalayo. Adeegyadani waa inay ku salaysanaadaan cilmibaaris la isla eegay ilaa heer macquul ah.

Sidoo kale, IEP waa inay ku jiraan bayaanka wixii waxka badalka ah ee barnaamij iyo taageero ee shaqaalaha dugsiga ah ee la bixin doono. IEP waa inay sidoo kale ku jiraan taariikhda la saadaaliyey ee bilawga adeegyada iyo waxkabadalka iyo inta jeer la filanayo inay soo noqdaan, goobta, iyo mudada adeegyadu soconayaan iyo waxkabadalka.

## Qiimaynaha Gobolka

Sharciga federaalka sida uu dhigayo, qiimaynaha gobolka waa in la mariyo dhamaan caruurta si loo go'aamiyo hadii dugsiyadu ay si meelmar leh u wadaan u dhigista caruurta heerka waxbarashada gobolka. Texas, heerarka waxbarashada waxaa loo yaqaan Aqoonta iyo Xirfadaha Daruuriga ah ee Texas kuwaas oo laga heli karo websaytka TEA https://tea.texas.gov/Academics/Curriculum_Standards/TEKS_Texas_Essential_Knowledge_and_Skills. Caruurta qabta laxaad la'aanta ee qaadata adeegyada waxbarashada gaarka ah waxa ay mari doonaan qiimaynaha gobolka ee ku haboon, taas oo ah qiimaynta joogtada ah ama qiimayn kale oo loogu talo geley caruurta qabta laxaad la'aanta garaadka ah ugu daran taas oo waafaqsan heerarka qiimaynta waxbarasho ee kale. Iyada oo aan la eegeynin hadii ilmahaagu uu maray qiimaynta rasmiga ah ama qiimaynta kale, qiimayntu waxay waafaqsan tahaya heerarka tijaabada waxbarasho ee Gobolka, oo ilmahaagu waa inuu ka helaa qaabilaad haboon qiimaynaha Gobolka iyo degmada oo dhan, hadii loo baahdo, sida lagu sheegey IEP-ga ilmaha.

Gudida ARD haddii ay go'aamiyaan in qaabilaadaha daruuri u tahay ilmahaagu si uu uga qayb qaato qiimaynaha, IEP waa inay la socotaa bayaanka qaabilaadaha munaasabka ah. Macluumaadka qaabilaada waxaa laga heli karaa https://tea.texas.gov/Student_Testing_and_Accountability/Testing/Student_Assessment_Overview/Accommodation_Resources.

Hadii gudida ARD ay go'aamiso in ilmahaagu ay tahay inuu qaato qiimayn kale halka uu ka geli lahaa qiimaynta gobolka ama degmada oo dhan, bayaanada waa in lagu sheegaa sababta ilmuhu aanu uga qayb gali karin qiimaynta caadiga ah iyo sababta qiimaynta kale loogu doortay inay ku haboon tahay ilmaha. Sidoo kale, hadii ilmahaagu uu galayo qiimayn kale, IEP-ga ilmahaaga waa in sidoo kale lagu daraa bartilmaameedka iyo ujeedooyinka mudada gaaban. Bartilmaameedka ama ujeedooyinka mudada gaaban waxa kaliya looga baahan yahay ardayda qabta laxaad la'aanta garaadka ee daran ee galaysa qiimaynta kale ee waafaqsan heerarka guusha waxbarasho ee kale.

Hadii ilmahaagu aanu helin natiijo wax ku ool ah qiimaynta gobolka, gudida ARD waa inay wax ka qabataa qaabka uu ilmuhu uga qayb galayo barnaamijka waxbarista la dedejiyey ama barnaamijka cufan ee waxbarista.

## Kala-guurka

IDEA iyo sharciga gobolku waxa uu dhigayaa in IEP-yada ardayda waawayn ay ka jawaabaan adeegyada kala-guurka. *Adeegyada Kala Guurka* waxaa weeye hawlo wada socda oo la isku duba riday oo loogu talo galay in laga caawiyo ilmaha inuu inta uu ka wareego hawlaha dugsiga uu u wareego hawlaha dugsiga kadib. Da'da qorshaynta kala-guurka ay tahay inay bilaabanto, hase yeeshee, way ku kala duwan yihiin sharciga federaalka iyo gobolku. Sida uu dhigayo sharciga Texas, waxaan ka danbaynin marka ardaygu uu gaadho 14 sano jirka, gudida ARD waa inay eegaan oo, hadii ay munaasab tahay, ay ka jawaabaan arrimaha IEP:

(1) Ka qayb galka ardayda ee munaasabka ah ee kala-guurka ardayga ee nolosha ka baxsan nidaamka waxbarashada dugsiga dadwaynaha;
(2) Hadii uu ardaygu uu ka yar yahay 18 jir, ka qayb galka munaasabka ee kala-guurka ardayga ee waalidka ardayga iyo dad kale ee lagu soo casuumay si ay uga qayb galaan:
    (A) Waalidka ardayga; ama
    (B) Degmada dugsiga uu ardaygu uu ku jiro;
(3) Hadii uu ardaygu uu yahay ugu yaraan 18 jir, ka qayb galka kala-guurka ardayga iyo mustaqbalka ee ardayga waalidkii iyo dadka kale, hadii waalidka ama qofka kale:
    (A) Uu kusoo casuumo ardaygu ama degmada dugsiga ee uu ardaygu ku jiro inuu ka qayb galo; ama
    (B) Ardaygu uu ogolaaday inuu kaga qayb galo heshiiska go'aan gaadhista la taageeray;
(4) Ikhtiyaarada waxbarashada dugsiga sare kadib ee munaasabka ah, oo ay ku jiraan laylisyada u diyaargawga heerka waxbarashada dugsiga sare kadib;
(5) Qiimaynta tobobarka shaqada munaasabka ah;
(6) Yoolasha shaqo ee munaasabka ah iyo ujeedooyinka;
(7) Hadii uu ardaygu uu yahay ugu yaraan 18 jir, helitaanka bii'adaha waxbarista da'da ku haboon, oo ay ku jiraan habdhismeedka bulshada ama bii'adaha u diyaarinaya ardayga waxbarashada ama tobobarka dugsiga sare kadib, shaqada isdhaxgalka ee loolanka leh, ama nolosha madaxa banaan, iyada oo lala kaashanayo yoolasha kala-guurka iyo ujeedooyinka ee ardayga;
(8) Yoolasha iyo ujeedooyinka nolosha madaxbanaan ee haboon;
(9) Xaaladaha haboon ee fududaynaya in ardayga ama waalidka ardayga loo gudbiyo hay'ada dawlada ee adeegyada ama gunooyinka dadwaynaha, oo ay ku jiraan u gudbinta hay'ada dawlada ee gelinaysa ardayda liiska sugayaasha gunooyinka dawlada ee uu heli karo ardaygu; iyo
(10) Isticmaalka iyo helitaanka munaasabka ah ee:
    (A) Kaalmada dheeraadka ah, adeegyada, manhajka, iyo fursadaha kale ee kaalmada ardayda ee kobcinta xirfadaha go'aan gaadhista; iyo
    (B) Taageerada iyo adeegyada lagu suurto gelinayo madax banaanida ardayga iyo aayo-ka-tashiga, oo ay ku jiraan heshiiska go'aan gaadhista taageerada.

Qaybta B ee IDEA waxay dhigayaan in laga bilaabo ugu dambayn IEP kowaad inuu dhaqan galo marka ilmuhu uu gaadho 16 jir, ama inta uu ka yar yahay hadii ay u arkaan inay munaasab tahay gudida ARD, IEP waa inay kujiraan yoolasha dugsiga sare kadib ee la cabiri karo ee munaasabka ah taas oo ku salaysan qiimaynaha kala-guurka da' ahaan munaasabka ah ee la xiriira tobobarka, waxbarashada shaqada, iyo meesha ay ku haboon tahay, xirfadaha nolosha madaxa banaan. IEP waa inay kujiraan adeegyada kala-guurka, oo waxaa ku jira waxbarashada duruusta, ee loogu baahan yahay ka caawinta in ilmuhu uu gaadho yoolashaas.

Ilmahaaga waa in lagu soo casuumaa kulanka gudida ARD marka adeegyada kala-guurka iyo yoolasha dugsiga sare kadib laga hadlayo. Hadii ilmahaagu aanu ka qayb gelin kulankaas, gudida ARD waa inay qaadaa talaabooyin ay ku xaqiijinayso in rabitaanka iyo danaha ilmahaaga la eego. Hadii uu ilmahaagu ka yar yahay 18 jir oo uu yahay ugu yaraanna 14 jir, gudida ARD waa inay sidoo kale ka fikirtaa sidii adiga iyo dad kale aad uga qayb gali lahaydeen kala-guurka ardayga oo aad adiga iyo dugsigu kusoo casuuntaan inay ka qayb galaan. Sidoo kale, ilaa inta haboon, marka aad qoraal ogolaansho ah soo gudbiso ama ogolaanshaha qoraalka ee ardayda wayn, dugsigu waa inuu soo casuumaa wakiilka hay'ad kasta oo ka qayb galaysa oo ay u badan tahay inay ka masuul noqoto bixinta ama bixinta kharashka adeegyada kala-guurka.

Marka uu ilmuhu gaadho 18 jir, gudida ARD waa inay isla eegaan oo, hadii ay munaasab tahay, ay ka jawaabaan ka qayb galka kala-guurka ardayga iyo mustaqbalka ee adiga iyo dad kale, hadii adiga ama qofka kale:

- Uu kusoo casuumo ardayga wayni ama LEA uu ardayga wayni uu ku jiro inuu ka qayb galo; ama
- Ardayga wayn ogolaansho ka haysto inuu ka qayb galo iyadoo la raacayo heshiiska go'aan gaadhista la taageeray.

**Ardayda Wayn**

Marka uu ilmuhu gaadho 18 jir, ilmuhu waxa uu noqdaa *arday wayn*. Ardayda waawayn waxa ay xaq u leeyihiin inay gaadhaan go'aanka naftooda iyada oo sharcigu dhigayo in aanu caqligiisu ku filnayn moojee. Kulanka gudida ARD ee la qabto hal mar sanadkii ugu yaraan kahor inta aanu gaadhin ilmuhu 18 jir, ilmahaagu waxa uu baran doonaa xuquuqdiisa gaadhista go'aanka waxbarashada waalidka inay kasoo wareegto oo isaga ku wareegayso. IEP-ga ilmahaaga waa inay la socotaa bayaanka xaqiijinta in waalidka iyo ilmaha loo sheegey wareejinta xuquuqda. Waa inay sidoo kale la socotaa bayaan sharaxaya macluumaadka iyo khayraadka la wadaagay ee koriyenimada, badalka koriyenimada, iyo macluumaadka la wadaagay ee taageerada iyo adeegyada loogu talo galay in lagaga caawiyo nolosha madaxa banaan.

Marka xuquuqdaada loo wareejiyo ardaygaaga wayn, adiga iyo ardaygaaga wayn ayaa la idiin soo wada diri doonaa dhamaan wargalimaha mustaqbalka ee loo baahan yahay. Laakiin, wargelimaha kulmada gudida ARD laguguma soo casuumi doono inaad ka qayb gasho kulamada. Waxa aad kaliya iman kartaa kulmada hadii ardaydaaga wayni uu kugu soo casuumo ama dugsigu kuu ogolaato inuu lagugu soo casuumo.

**Caruurta Qabta Otisamka**

Ilmaha qaba otisam, waxaa jira 11 khidadood oo ay tahay in la isla eego, sida ay dhigayaan 19 TAC §89.1055, iyada oo laga duulayo dhaqamada waxbarasho ee ku salaysan daraasada ee la isla eegay ilaa inta ay macquulka tahay. Marka loo baahdo, khidadahan waa in lagaga jawaabo IEP-ga. Marka aan loo baahnayn, IEP-ga waa in lagu daro bayaanka guud ahaan iyo aasaaska go'aaminta lagu gaaray. Khidado dheeraad ah oo ay tahay gudidu ARD inay eegaan waa:

- Barnaamijka waxbarashada mudadiisa la kordhiyay;
- Jadwalada maalinle oo muujinaya wakhtiga ugu yar ee aan qaabaysnayn;
- Tobobar guriga iyo bulshada ah, ama ku salaysan ikhtiyaaro la awoodi karo;
- Khidadaha taageerada habdhaqanka wanaagsan;
- Qorshaynta mustaqbalka;
- Tobobarka waalidka/qoyska, iyo taageerada;
- Saamiga shaqaalaha-ka-ilmaha oo ku haboon ee hawlaha la ogaaday;
- Waxkaqabadka xiriirka;
- Taageerada iyo khidadaha xirfadaha bulshada;
- Taageerada baraha/shaqaalaha xirfadlaha ah; iyo
- Khidadaha wax dhigista ee ku salaysan dhaqamada la isla eegay, ee salaysan daraasad.

## Caruurta Dhagaha La' ama Dhagaha Culus

Ilmaha dhagaha la' ama dhagaha culus, gudida ARD waa inay eegaan ilmaha:

- Baahiyaha luuqadda iyo xiriirka;
- Fursado xiriir toos ah oo lodka iyo xirfadlayaasha shaqaalaha uu la sameeyo iyadoo la adeegsanayo luuqada iyo qaabka xiriirka ilmaha;
- Heerka waxbarashada; iyo
- Baahiyaha kala duwan oo ilmaha, oo ay ku jiraan fursado waxbaris toos ah oo luuqada iyo qaabka xiriirka ilmaha la adeegsanayo.

## Caruurta Indhaha La' ama Aragtoodu Liito

Sida uu dhigayo sharciga gobolka, ilmo kasta oo indho la' ama aragiisu liito, gudida ARD waa inay kusoo dartaa waxbarista IEP ee ilmaha farta indhoolaha iyo isticmaalka farta indhoolaha iyada oo gudida ARD ay go'aamiyaan oo ay duwaan geliyaan moojee in farta indhooluhu ayna ku haboonayn aqoonta ilmaha. Go'aanka gudida ARD waa in uu ku salaysan yahay qiimaynta qaabka aqoonta ku haboon ilmaha iyo xirfadaha aqoonta akhriska/qorista iyo baahiyaha wakhtigan iyo mustaqbalka ee waxbarista ee ilmaha.

Sida uu dhigayo sharciga gobolka, ilmaha indhaha la' ama aragiisu liito, gudida ARD waa inay eegtaan baahida ilmaha ee:

- Xirfado waxtarka leh, sida farta indhoolaha iyo korniinka nuxurka, iyo xirfadaha kale ee loo baahan yahay si loo adeegsan karo manhajka intiisa kale;
- Macluumaadka hordhaha iyo tilmaamaha socodka;
- Xirfadaha dhexgalka bulshada;
- Qorshaynta mihnada;
- Teknooloojiyada kaalmada, oo ay ku jiraan aaladaha aragga;
- Xirfadaha nolosha madaxbannaan;
- Xiisaha faakidaysiga iyo madadaalada;
- Aayo-ka-tashiga; iyo
- Waxtarka dareenwadka.

## Qorshaha Wax-Ka-Qabadka Habdhaqanka (BIP)

Hadii gudida ARD ay go'aamiso in qorshaha waxka qabadka habdhaqanka ama BIP uu ku munaasab yahay ilmaha, qorshahaas waa inuu qayb ka noqdaa IEP ilmahaaga oo la siiyaa macalin kasta oo ka masuul ah wax u dhigista ilmahaaga.

## Adeegyada Sanad Dugsiyeedka la Dheereeyey

Gudida ARD waa inay eegaan hadii uu u qalmo ilmahaagu adeegyada ESY. Ilmahaagu waxa uu u qalmaa adeegyada ESY haddii, hal aag ama wax ka badan oo daruuri ah oo lagaga jawaabay ujeedooyinka iyo yoolasha IEP-ga wakhtigan ee ilmahaaga, ilmahaaga lagu arkay, ama ay macquul tahay in laga filayo in lagu arki karo, dib u dhac aad u daran ama wayn oo aanu markaa mudo macquul ah aanu dib ugu kasban karin. Xeerka *dib u dhac aad u wayn ama daran* waxa uu ka dhigan yahay ilmahaagu inuu ahaa,

ama uu noqon doono, mid aan awoodin inuu joogteeyo hal ama wax ka badan xirfadaha muhiimka ah ee uu bartay hadii aanu helin adeegyada ESY.

Hadii gudida ARD ay go'aamiso in ilmahaagu uu u baahan yahay adeegyada ESY, IEP waa in lagu ogaado yoolasha iyo ujeedooyinka IEP ee lagaga jawaabayo mudada adeegyada ESY. Hadii dugsigaagu aanu ku talin in lagaga wada hadlo adeegyada ESY kulanka gudida ARD ee sanadkii, waxa aad dalban kartaa in gudida ARD ee ilmahaagu ay ka wada hadasho u qalankiisa adeegyada ESY. Macluumaadka ku saabsan adeegyada ESY waxaa laga heli karaa: https://tea.texas.gov/Academics/Special_Student_Populations/Special_Education/Programs_and_Services/Extended_School_Year_Services_for_Students_with_Disabilities.

## Meelaynta

IDEA waxa ay u baahan tahay in ilmaha laxaadka la' wax lagu baro *bii'adda ugu xirxirnaanta yar.* Taasi waxay ka dhigan yahay in ilmuhu ay tahay inuu wax la bartoo caruur aan qabin laxaad la'aan inta ugu badan ee munaasabka ah. Ka saarida ilmahaaga deegaanka waxbarashada caadiga ah waxay kaliya dhici kartaa haddii nooca ama darnaanshaha laxaad la'aanta ay tahay qaab aan lagu gaadhi karin guusha la doonayo waxbarashada fasalka caadiga ah iyada oo la adeegsanayo kaalmo iyo adeegyo dheeraad ah.

*Kaalmada iyo adeegyada dheeraadka ah* waxay ka dhigan yihiin kaalmada, adeegyada, iyo taageerooyinka kale, kuwaas oo lagu bixiyo fasalka waxbarashada caadiga ah, meelaha kale ee waxbarashada la xiriira, iyo meelaha kale ee waxbarashada ka baxsan iyo wixii aan waxbarashada ahayn, si caruurta naafada ah loogu sahlo in ay wax la bartaan caruurta aan naafada ahayn ilaa inta ugu badan ee macquulka ah.

Qaybta asalka ah ee nidaamka waxbarashada gaarka ah waxa ay ku lug leedahay go'aaminta meelaynta waxbarashada munaasabka ah ee hirgelinta ilmaha IEP-giisa. Meelaynta waxaa loola jeedaa qaybaha la socda sii socodka ikhtiyaarada meelaynta (sida, fasalada caadiga ah, fasalada gaarka ah, dugsiyada gaarka ah, waxbarista guriga ku salaysan, waxbarista isbitaalada iyo macaahidda) ee uu heli karo ilmaha laxaadka la'. Meelaynta loolama jeedo goobta la taaban karo ee gaarka ah ama barta halkaasoo adeegyada lagu bixin doono. Gudida ARD waxay go'aamiyaan meelaynta waxbarasho ee ku salaysan IEP ilmaha.

## Go'aanka Gudida ARD

Go'aanka gudida ARD ee ku saabsan qaybaha loo baahan yahay ee IEP waa in lagu gaaraa heshiis ay isku waafaqsan yihiin xubnaha gudida hadii ay macquul tahay. Heshiiskan labada dhinac ah waxaa loo yaqaan is afgarad. Gudida ARD waa inay ka shaqaysaa is afgaradka, laakiin dugsiga waxa saaran masuuliyada ugu saraysa ee lagu xaqiijinayo in IEP ay ku jiraan adeegyada ilmahaagu u baahan yahay si uu u helo FAPE. Lama ogola in lagu gaadho go'aanada gudida ARD wax ku salaysan codka tirada badan. IEP waa in lagu muujiyaa hadii adiga iyo maamulaha aad ogolaateen ama diideen go'aanada gudida ARD.

Hadii aad diideen go'aanada gudida ARD, waxa la idin siin fursad kaliya in gudidu hakin galiso mudo aan ka badnayn 10 maalmood oo waxbarasho iyada oo adiga iyo dugsigu aad ku wada heshiisaan wax kale moojee. Hadii aad ogolaataan inaad aqbashaan hakinta iyo dib u kulmidda, gudida ARD waa inay

qabataa balan dib u qabashada kulanka kasoo labada dhinacba ku heshiiyeen wakhtiga iyo goobta. Laakiin, hadii joogitaanka ilmaha ee xaruntu ay ugu jirto khatar waxyeelo jireed oo ilmahaaga ama dadka kale ah, ama hadii ilmahaagu uu ku kaco fal dambi ah oo eri keeni kara ama danbi keeni kara ku meelaynta barnaamij waxbarashada anshax marinta badiilka ah, gudida ARD ma hakin doonaan xataa hadii aanad ku qancin go'aanada gudida ARD.

Inta lagu jiro hakinta, xubnaha waa inay isla eegaan ikhtiyaaro kale, ay soo uruuriyaan macluumaad kale, diyaariyaan waraaqo dheeraad ah, iyo/ama ay helaan shakhsiyaad khayraad dheeraad ah oo ka caawin kara gudida ARD inay gaadhaan heshiis loo dhan yahay. Hadii gudida ARD ay mar kale kulmaan oo aadan wali khilaafsan tahay, iyada oo is afgaranwaagaasi ku taxaluuqo bilawga hore ee adeegyada moojee ee loo baahan yahay ogolaanshaha, dugsigu waa inuu hirgeyaa IEP-ga uu dugsigu go'aamiyay inuu ku haboon yahay ilmahaaga.

Marka dhinacyadu ayna ku heshiin, bayaan qoraal ah oo ku salaysan is afgaranwaaga waa in lagu daraa IEP-ga. Hadii aanad ku qancin go'aanka gudida ARD, waa in lagu siiyaa fursad aad ku qorto bayaankaaga aad kaga soo horjeedsatay. Dugsigu waa inuu ku siiyaa qoraal hore oo wargelinta ah ugu yaraan shan maalmood oo waxbarasho kahor inta aan la hirgelin IEP-ga, iyada oo aad ogolaato mudo ka gaaban moojee.

Gudida ARD waxa ay sidoo kale dooran kartaa inay u hakiso sababo kale oo aan ahayn in lagu heshiin waayay dhamaan qaybaha IEP-ga ee loo baahan yahay.

## Nuqulka IEP

Dugsigu waa inuu ku siiyaa nuqul IEP-ga ilmahaaga ah oo bilaash ah. Sida uu dhigayo 19 TAC §89.1050(i), hadii aanad ku hadli karin Ingiriisi oo luuqadaada hooyo ay tahay Isbaanish, dugsigu waa inuu nuqul qoraal ah ama cod duuban oo IEP-ga ilmahaaga oo lagu turjubay Isbaanish uu ku siiyaa. Hadii aanad ku hadli karin Ingiriisi oo luuqadaada hooyo ayna ahayn Isbaanish, dugsigu waa inuu dadaal daacad ah u galaa inuu nuqul qoraal ah ama cod duuban oo IEP-ga ilmahaaga oo lagu turjubay luuqadaada ku siiyo. Hadii ilmahaagu aanu ku hadli karin Ingiriisi oo luuqadaada hooyo ayna lahayn qoraal, dugsigu waa inuu qaadaa talaabo uu ku xaqiijinayo in IEP ilmahaaga cod laguugu turjubo ama qaab kale oo luuqadaada hooyo ah. Turjubaada qoraalka ah waxay ka dhigan tahay in dhamaan qoraalka IEP-ga ilmahaaga loo turjubo qaab qoraal ah. Dugsigu waxa uu ku siin karaa cod duuban kulanka gudida ARD hadii uu ku caawiyay turjubaan ama turjubaad kulanka ah, ilaa inta ay macluumaadka IEP-ga ilmahaaga cod ahaan lagu turjubay oo la duubay.

Qaybta B ee IDEA waxay dhigaysaa, dugsigu inuu qaado wixii talaabo ah ee daruuri ah ee lagu xaqiijinayo in waalidku uu fahmo nidaamka kulanka gudida ARD, waxaana kamid ah u diyaarinta turjubaan waalidka dhagaha la’ ama kuwa luuqadooda kowaad ayna ahayn Ingiriisi.

## Eegitaanka IEP-ga

Gudida ARD waa inay kulantaa ugu yaraan hal mar sanadkii si ay u eegto IEP-ga ilmahaaga oo ay u go'aamiso hadii yoolalka sanadkii la gaaray. Gudida ARD waxay ku kulmi kartaa in halmar ka badan sanadkii si ay dib u eegid ugu samayso IEP-ga ilmahaaga, sida kolba munaasabka ah, si ay uga jawaabto:

- Wixii dib looga dhacay hormarka la filanayay in la gaaro yoolalka sanadkii iyoxagga manhajka guud;

- Natiijooyinka wixii dib u qiimayn ah;
- Macluumaadka ku saabsan wixii ilmuhu bixiyey, ama uu waalidku bixiyey;
- Baahiyaha la saadaaliyey ee ilmaha; ama
- Arrimo kale.

Waxa aad dalban kartaa in kulanka gudida ARD lagaga wada hadlo wixii walaac waxbarasho ee ilmahaaga. Dugsigu waa inuu ama bixiyaa dalabkaaga oo qoraal ah si loo yeesho kulanka ama, shan maalmood oo waxbarasho gudahood, ku siiyaa wargelin qoraal ah oo sharaxaysa sababta uu dugsigu u diiday in kulanka la qabto. Hadii aanad ku hadli karin Ingiriisi, dugsigu waa inuu wargelinta kugu siiyaa luuqadaada, iyada oo ayna macquul ahayn in taas la sameeyaa moojee. Hadii luuqadaada hooyo ayna lahayn qoraal, dugsigu waa inuu qaadaa talaabo uu ku xaqiijinayo in wargelinta hadal ahaan laguugu turjubo ama qaab kale oo aad ku fahmi karto wargelinta.

Adiga iyo dugsiga ayaa ku heshiin kara in isbadal lagu sameeyo IEP-ga iyada oo aan la qaban kulan gudida ARD ah. Laakiin, isbadalada go'aaminta u qalanka, isbadalada meelaynta, iyo go'aaminta caddaynta sababta waa in lagu gaadhaa kulanka gudida ARD. Hadii IEP la badalayo iyada oo aan la gelin kulanka gudida IEP, waa inay jiraan waraaqo qoraal ah oo muujinaya isbadalada lagu heshiiyay. Marka aad dalbato, dugsiga waa inuu ku siiya nuqulka IEP-ga ee dib u eegista lagu sameeyay oo wax ka badalna lagu daray. Sidoo kale, dugsigu waa inuu xaqiijiyaa in gudida ARD ee ilmahaaga loo sheego isbadaladaas.

**Dib u qiimayn**

Marka uu ilmuhu bilaabo qaadashada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, dib u qiimayn mudadiiba mar ah ayaa loo baahan yahay. Dugsigu waa inuu dadaal macquul ah u galaa helitaanka ogolaanshahaaga bilawga dib u qiimaynta. Hadii aad ka jawaabi waydo iyada oo dadaal macquul ah la geliyay, dugsigu waxa uu samayn karaa dib u qiimayn iyada oo aan lagaa helin ogolaanshahaaga. Hadii aad diido ogolaanshahaaga dib u qiimaynta ilmahaaga, dugsigu waxa uu, laakiin waajib kuma aha, dalban karaa dhexdhexaadin ama waxa uu dalban karaa dhagaysiga hannaanka xaqsoorka si diidmadaas loo badalo oo dib u qiimaynta loo sameeyo. Dugsigu kuma uu xad gudbin masuuliyada ogaanshaha ilmaha ama waajibaadkiisa qiimaynta ilmahaaga hadii dugsigu aanu raadin in la badalo diidmada dib u qiimaynta.

Dib u qiimayntu waxay lamid tahay qiimaynta hore. Dib u qiimayntu waa inay dhamaystiran tahay si loo go’aamiyo hadii ilmahaagu uu sii qabayo laxaad la’aanta iyo baahiyaha waxbarashada ee ilmahaaga. Iyada oo adiga iyo dugsigu aad ku wada heshiisaan moojee wax kale, dib u qiimaynta ilmahaaga waa in la sameeyaa ugu yaraan sadex sano kasta. Wax ka badan hal dib u qiimayn waa inayna dhicin sanad gudihii iyada oo adiga iyo dugsigu aad ku heshiisaan moojee si kale.

Qiimaynta macluumaadka hore loo hayo (review of existing evaluation data, **REED**) waa inay qayb ka noqotaa qiimaynta hore, hadii ay munaasab tahay, REED waa inuu dhacaa oo waa inay qayb ka tahay dib u qiimayn kasta oo ilmahaaga lagu samaynayo IDEA sida ay dhigayso. Dugsiga looma baahan inuu helo ogolaanshahaaga si uu u qiimeeyo macluumaadka hore u jiray. REED waa inay sameeyaan gudida ARD, oo aad adigu ku jirto, laakiin maaha inay kulan ka qabsoonto. Xubanuhu waa inay qiimeeyaan macluumaadka hore ee jira ee ku saabsan ilmahaaga, oo ay ku jiraan macluumaadka aad bixiso, si loo go'aamiyo baaxada qiimaynta ama dib u qiimaynta.

Hadii ilmahaaga hore uu u qaadanayay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, gudida ARD ayaa go'aaminaya nooca qiimaynta dheeraadka ah, hadii ay jirto, ee loo baahan yahay si loo go'aamiyo hadii wax dheeraad ah lagu daro ama wax ka badal lagu sameeyo waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga iyo adeegyada la xiriira.

Hadii ay gudida ARD ay go'aamiso in qiimayn dheeraad ah aan loo baahnayn si loo go'aamiyo hadii ilmuhu uu sii wadi baahida waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, sababaha go'aankan waa in adiga laguu sharaxaa. Kadib marka laguu sharaxo sababaha gudida ARD ay u go'aamisay in macluumaadka qiimaynta ee hore u jiray ay ugu filan yihiin, dugsiga looma baahna inuu qabto qiimayn cusub si uu u sameeyo dib u qiimayn loo baahan yahay iyada oo aad dalbato in dugsigu uu sidaa sameeyo moojee.

**Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan (IEE)**

Hadii aanad ku qancin qiimaynta ama dib u qiimaynta dugsiga, waxa aad dalban kartaa IEE uu dugsigu bixiyo kharashkeeda. Dugsigu waa inuu ku siiyaa macluumaad ku saabsan halka laga heleyo IEE oo uu ku siiyaa nuqul shuruudaha dugsiga ee helitaanka IEE ah. IEE waa inay buuxisaa shuruudaha dugsiga. Hadii aad ka dalbato IEE, dugsigu, iyada oo aanu iman dib u dhac aan loo baahnayn, waa inuu bixiyaa kharashka IEE ama dalbadaa dhagaysiga hannaanka xaqsoorka si uu u muujiyo qiimayntiisu inay munaasab tahay. Waxa aad xaq u leedahay kaliya hal IEE oo dawladu kharashkeeda bixiso mar kasta oo dugsigu sameeyo qiimayn. Hadii dugsigu uu dalbado dhagaysi oo sarkaalka dhagaysigu uu go'aamiyo in qiimaynta dugsigu ay munaasab ahayd, waxa aad weli xaq u leedahay IEE, laakiin ma bixinayo kharashkiisa dugsigu. Macluumaadka aad ka heshey IEE ee buuxinaya shuruudaha dugsiga waa inay eegaan gudida ARD marka ay ka jawaabayaan bixinta FAPE iyada oo aan la eegeynin hadii uu dugsigu bixinayo kharashka IEE iyo hadii kale.

**Ka Noqosho Oggolaanshaha Adeegyada**

Sida aad awood ugu leedahay ogolaanshaha bixinta hore ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, waxa aad awood u leedahay inaad ka noqoto ogolaanshaha adeegyada. Ka noqoshada ogolaanshahaagu waa inay qoraal noqotaa. Marka uu dugsiga soo gaadho qoraalkaaga ka noqoshada ahi, waa inuu u hogaansamaa go'aankaaga. Laakiin, kahor inta aanu dugsigu joojin adeegyada, waa inuu ku siiyaa qoraal wargelin ah oo hore in adeegyada la joojinayo. In kasta oo dugsigu ay tahay inuu joojiyo adeegyada, dugsiga kuma waajib aha inuu wax ka badalo duwaanka waxbarashada ilmaha si uu uga saaro dhamaan wixii tixraac ah ee ilmahaagu inuu ku jiray ah waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ah mudooyinkii hore.

Hadii aad ka noqoto ogolaanshahaaga ee sii wadista bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ilmahaaga waxaa loo arki inuu yahay arday waxbarashada guud dhigta oo uma yeelanayo xaq ilaalinta uu ka heleyo IDEA. Sidoo kale, hadii aad ka noqoto ogolaanshahaaga adeegyada, dugsigu waxa dhici karta in aanu dalban dhexdhexaadin ama dhagaysiga hannaanka xaqsoorka si uu iskugu dayo in la badalo ama uu go'aankaaga ka doodo.

**Qalinjabinta**

Mid kamid ah ujeedooyinka nidaamka waxbarashada dadwaynaha ee Texas waa in ardaydu ay ku jiraan dugsiga ilaa inta ay heleyaan dibloomada dugsiga sare. Ardaydu waa inay buuxisaa shuruudaha qaar si

ay uga qalin jabiso dugsiga sare oo ay u helaan dibloomada dugsiga sare. Ilmaha qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsigu waa inuu raacaa nidaamyo cayiman marka uu u diyaarinayo ardayga qalin jabinta ama uu soo afjarayo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee ardayga maadaama oo aanu ardaygu wixii intaa wixii ka danbeeya buuxinin shuruudaha u qalanka da'da. Sidoo kale, gudida ARD ayaa kaalin muhiim ah ka ciyaaraysa go'aamada qaar ee ku saabsan qalinjabinta.

Sida uu dhigayo IDEA, waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha waa inuu heli karaa ilmaha ama ardayga qofka wayn ah ee u qalmaa ilaa inta isaga ama iyadu ay ka qalin jabinayso oo ay qaadanayso dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah ama ay dhaafayso shuruudaha u qalanka da'da ee waxbarashada gaarka ah ee bilaashka ah ee munaasabka ah sida uu dhigayo sharciga gobolku, taas oo ah da'da 21 ama ilaa sanadguurada dhalashada 22aad ee ardaygan halkan Texas. Ardayga wayn ee qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee gaadhay 21 jir Sebteembar 1 sanad dugsiyeedka waxa uu u qalmaa adeegyada ilaa dhamaadka sanad dugsiyeedka ama ilaa inta uu qalin jabinayo ee uu heleyo dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah marka uu buuxinayo heerarka manhajka iyo shuruudaha dhibcaha ee khuseeya ardayda ku jira waxbarashada guud, kolba kii soo horeeya.

Marka ilmaha ama ardayga qofka wayn u qalankiisa waxbarashada gaarka ah loo soo afjarayo maadaama oo uu qalin jabiyay oo la siiyay dibloomada dugsiga sare ee caadiga ah ama maadaama oo uu ka waynaaday da'dii loogu talo galay waxbarshada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsigu waa inuu wargelin qoraal ah oo hore ku siiyaa soo afjarista adeegyada. Sidoo kale, dugsigu waa inuu bixiyaa guudmarka ilmaha ama ardayga wayn heerka uu ka gaadhay waxbarashada iyo waxqabadkiisa, taas oo ay kamid tahay talooyinka sida looga caawinayo ilmaha ama ardayga qofka wayn ah inuu gaaro yoolasha dugsiga sare kadib ee ilmaha ama ardayga qofka wayn ah.

Ilmaha ama ardayga wayn ee qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha wuu qalin jabin karaa oo waxaa la siin karaa dibloomada dugsiga sare isaga oo buuxinaya isla heerarka manhajka iyo shuruudaha dhibcaha ee ardayda waxbarashada guud mid kamid ah afarta barnaamij ee qalin jabinta (sida, Foundation High School Program, Recommended High School Program, Distinguished Achievement High School Program, ama Minimum High School Program), oo sidoo kale ka gudbaya qiimaynaha gobolka ee waajibka.

Dhamaan ardayda qalin jabisay ee u qalma waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada gaarka ah ee u qalankiisa meesha laga saaray maadaama oo uu qaatay shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah waa in la siiyaa guudmarka guusha waxbarashada iyo waxqabadka shaqada. Guudmarkan waa in lagu eegaa, kolka ay ku haboon tahay, aragtida waalidka iyo ardayga iyo talooyinka qoraalka ah ee hay'ada adeegga dadka waawayn ee ku saabsan sida looga caawiyo ardayga inuu gaadho yoolasha dugsiga sare kadib. Ardayda qaar, guudmarka waa inuu ku jiraa qiimaynta ardayga.

Ilmaha ama ardayga qofka wayn ah ee qalin jabiyay ee aan qaadan shahaadada dugsiga sare ee ka yar 22 jir waxa uu weli u qalmaa waxbarashada dadwaynaha ee munaasabka ah ee bilaashka ah sida uu dhigayo IDEA. Ilmuhu waxa uu, xaalada qaar, awoodaa inuu kusoo noqdo dugsiga oo uu qaato adeegyada ilaa dhamaadka sanad dugsiyeedka ee sanadka uu gaadhay 22 jirka. Hadii ilmahaagu uu doono inuu kusoo noqdo kadib marka uu qalin jabiyo, gudida ARD waa inay go'aamisaa adeegyada waxbarashada ee loo baahan yahay.

## Anshax Marinta

Waxaa jira shuruuc gaar ah oo khuseeya talaabooyinka anshax marinta ee ay tahay in laga qaado ilmaha laxaadka la'. Guud ahaan, ilmaha laxaadka la' lagama eryi karo waxbarashada uu wakhti xaadirkan ku jiro wax ka badan 10 maalmood oo waxbarasho oo xidhiidhsan hadii uu habdhaqankiisa qalafsan uu la xidhiidho laxaad la'aantiisa. Sidoo kale, xaaladaha qaar ee anshax marinta ee ka yimaada ficilo ka yimid ardayda laxaad la'aantiisa waxaa loo baahan yahay in laqabto kulanka gudida ARD.

### Saaritaanada Mudada Gaaban

Saraakiisha dugsiga waxa ay ka eryi karaan ilmaha waxbarashadiisa wakhtigan hadii ilmuhu uu ku xad gudbo xeerka anshaxa. Ke saaridani waxay ku munaasab noqon kartaa habdhismeedka waxbarashada kale ee kumeel gaadhka ah (interim alternative educational setting, **IAES**), habdhismeedka kale, ama in la eryo wax aan ka badnayn 10 maalmood oo waxbarasho oo xidhiidhsan ilaa inta ay khuseeyaan talaabooyinka anshax marintu caruurta aan laxaadka la'ayn, iyo wixii ka saaritaano dheeraadka ah waxaan ka badnayn 10 maalmood oo waxbarasho isla sanad dugsiyeed kaliya, wixii dhacdooyinka kale ee habdhaqan xumo ah ilaa inta ka saaritaanadaasi ayna keeneyn wax ka badal waxbarashada uu dhigto. Waxaa tan badanaa loo yaqaan *sharciga 10-maalmood*.

Saaritaanada anshax marinta 10 maalmood oo waxbarasho oo xidhiidhsan ama wax ka yar ma keenayaan shuruuda ah in la qabto kulanka gudida ARD, iyada oo ka saaridu ay keeneyso in meel kale la geliyo moojee. Degmo dugsigu ma siiso adeegyada ilmaha qaba laxaad la’aanta ama ilmaha aan laxaad la’aanta qabin ee laga saaray booskiisa mudo 10 maalmood ama ka yar oo waxbarasho sanad dugsiyeedkaas.

### Wadarta Saaritaanada oo Ah 10 Maalmood ama Ka Badan

Saraakiisha dugsigu waxay dalban karaan ka saaritaano kale oo mudo kooban isla sanad dugsiyeedka wixii dhacdooyin kale oo habdhaqan xumo ah, haddii saaritaanadani ayna keeneynin isbadal meelaynta ah. Kadib marka ilmahaaga la eryay wadarta 10 maalmood oo waxbarasho sanad dugsiyeed kaliya, hadii saarida wakhtigan ayna ka badnayn 10 maalmood oo waxbarasho oo xidhiidhsan oo aan lagu samaynin isbadal meelaynta ah, dugsigu waa inuu bixiyaa adeegyada si markaa ilmaha loogu suurtogeliyo inuu sii wado ka qayb galka manhajka waxbarashada guud, in kasta oo habdhismeed kale ay noqonayso, oo laguna socdo gaarista yoolasha ku jira IEP-ga ilmahaaga. Shaqaalaha dugsigu waa inay kala tashadaan ugu yaraan hal macalimiinta ilmaha ah si uu u go'aansado adeegyada loo baahan yahay. Ogow in IDEA ay dhigayso in 34 CFR §300.530(d)(5) in gudida ARD ay go’aamiyaan adeegyada haboon hadii ka saarida ay tahay meel kale in la gelinayo.

### Isbadalka Meelaynta

Ka saarida ilmaha qaba laxaad la'aanta waxbarashada wakhtigan waa *isbadal meelaynta ah* hadii saaridu ay tahay wax ka badan 10 maalmood oo waxbarasho oo xidhiidhsan ama ilmaha marar badan laga saaray taas oo muujinaysa wax soo noqnoqnaya. Ka saaritaanada soo noqnoqotaa waxay yimaadaan marka:

- Ka saaritaanada waxay wadar ahaan ka badan yihiin 10 maalmood oo dugsi sanad dugsiyeedka;
- Habdhaqanka ilmaha waxa uu si wayn ula mid yahay dhaqankiisa dhacdooyinkii hore kuwaas oo keenay ka saaritaanada isku xig xiga; iyo

- Xaaladaha sida mudada ka saarid walba, wadarta guud ee wakhtiga ilmaha la eryey, iyo isku dhawaanshaha ka saaritaanada ee midba ta kale.

Dugsiga ayaa go'aaminaya arday walba si qof-qof ah haddii ka saaritaano soo noqnoqda ay keenayaan isbadal meelaynta ah. Waxa aad ka doodi kartaa go'aanka dugsiga ee ku saabsan hadii qaabka ka saaridu uu ku yimid dhagaysi xannaanka xaqsoorka ah iyo xukun.

Hadii dugsigu uu ku talinayo ka saarid keeneysa isbadal meelaynta ah, saraakiisha dugsiga waa inay kugu wargeliyaan go'aanka oo ay ku siiyaan nuqul *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta*. Waa in taas la sameeyaa taariikhda go'aanka lasoo saaray si loo badalo meelaynta ilmaha. Sidoo kale, dugsigu waa inuu qabtaa kulan gudida ARD ah si ay u eegaan waxa loo yaqaan go'aaminta caddaynta. Kulanka go’aaminta caddaynta waa inuu dhacaa 10 maalmood oo waxbarasho gudahood oo ka bilaabma taariikhda go’aanka la gaadhay si loo badalo meesha uu ardaygu uu ku jiro.

Go'aanka Caddaynta

Marka la samaynayo *go'aaminta caddaynta*, gudida ARD waa inay qiimeeyaan dhamaan macluumaadka khuseeya ee faylka ilmahaaga kujira, oo ay ku jiraan IEP-ga, wixii macalinku ku arkay, iyo macluumaadka kale ee la xiriira ee aad bixisay si loo go'aamiyo:

- Haddii dhaqanka la is waydiinayo uu keenay, ama uu la lahaa xiriir toos ah oo muuqda, naafanimada ilmahaaga; ama
- Hadii habdhaqanka laga hadlayo uu ahaa natiijada tooska ee guuldareysiga dugsiga ee hirgelinta IEP-ga.

Hadii ay gudida ARD ay go'aamiyaan in xaaladahan aan la buuxin, markaa habdhaqanku waa wax ka dhashay laxaad la'aanta ilmaha. Hadii gudida ARD ay go'aamiyaan in waxba aan shuruudaha la buuxin, markaa habdhaqanku ma aha wax ka dhashay laxaad la'aanta ilmaha.

Marka Habdhaqanka Caddayn

Hadii habdhaqanka ilmuhu yahay mid ay keenayso laxaad la'aantiisu, gudida ARD waa inay:

- Qabtaan qiimayn habdhaqanka shaqada ah (functional behavioral assessment, **FBA**), iyada oo dugsigu qabtay FBA kahor habdhaqanka keenay isbadalka meelaynta inta aanu iman, oo dhaqan geliyaan BIP; ama
- Hadii BIP hore loo sameeyay, ay eegaan BIP oo wax ka badal ku sameeyaan sida loogu baahdo in lagaga jawaabo habdhaqanka.

Sidoo kale, gudida ARD waa inay ilmaha ku celisaa waxbarashadiisii ilmaha laga saaray iyada oo:

- Adiga iyo dugsigu aad ku heshiisaan moojee isbadal meelaynta ah taas oo qayb ka ah wax ka badalka BIP-ka ilmahaaga; ama
- Ilmahaaga ku xadgudubkiisa xeerka anshaxa ardayda uu ku lug leeyahay mid kamid ah xaaladaha gaarka ah ee hoos lagu sheegey.

Hadii gudida ARD ay go'aamiso in habdhaqanka ilmuhu uu ka yimid dugsiga oo ku guuldaraystay fulinta IEP-ga, dugsigu waa inuu qaataa talaabooyin degdeg ah oo wax lagaga qabanayo fashalkaas.

### Marka Habdhaqanku Ahayn Caddayn

Hadii habdhaqanku aanu ahayn wax ka dhashay laxaad la'aanta ilmahaaga, shaqaalaha dugsiga ayaa u anshax marin kara ilmaha qaab lamid ah caruurta kale, marka laga tago in loosii wadi doonaa adeegyada munaasabka ah ee waxbarashada. Gudida ARD ee ilmaha waxa ay go'aamin doonaan IAES ee ilmahaaga la siin doono.

### Duruufo Gaara

Shaqaalaha dugsiga waxa ay u wareejin karaan ilmahaaga IAES ilaa 45 maalmood oo waxbarasho iyada oo aan la eegeynin hadii habdhaqanku yahay wax ka dhashay laxaad la'aantiisa xaaladaha ilmahaagu:

- Uu soo qaato ama uu lasoo galo hub dugsiga, dhismaha dugsiga ama hawlaha kale ee waxbarasho;
- Inuu u kas ah ugu hayso ama uu ugu isticmaalo mukhaadaraad ama uu ku iibiyo ama uu doono inuu ku iibiyo mukhaadaraad inta uu joogo dugsiga, dhismaha dugsiga, ama hawlaha uu waxbarasho; ama
- U gaystay dhaawac halis ah qof kale markuu joogay dugsiga, dhismaha dugsiga, ama halwlaha kale ee dugsiga.

Gudida ARD waxa ay go'aamin doontaa IAES-ka ilmahaaga la siin.

### Ilaalinta Caruurta Aan Weli La Go'aamin Inuu u Qalmo Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada La Xidhiidha

Hadii aan ilmahaaga la go'aamin inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira laakiin uu ku kacay habdhaqan ka hor imanaya xeerka anshaxa ardayga, ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay ilaalinta nidaamka ee IDEA hadii dugsigu uu ogyahay in ilmahaagu uu ahaa ilmo qaba laxaad la'aan kahor inta ayna habdhaqanku dhicin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mawduucan waxaa laga heli karaa *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta*.

## **Dhagaysiga Hannaanka Xaqsoorka ee la Dedejiyey**

Hadii aanad ku qancin go'aanka ku meelaynta IAES ama go'aaminta cadaynta, waxa aad dalban kartaa dhagaysiga hannaanka xaqsoorka oo la dedejiyay. Dugsigu waxa uu sidoo kale dalban karaa dhagaysiga hannaanka xaqsoorka hadii dugsigu uu doonayo inuu ka doodo kusoo noqodka ilmaha ee waxbarashada kadib marka ay gudida ARD ay go'aamiyeen in habdhaqankiisa uu ka yimid laxaad la'aantiisa.

## **Xalinta Muranka**

Wakhti ka wakhti, waxaa iman kara muran la xiriira aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarashada, ama siinta FAPE ee ilmahaaga laxaadka la'. Hadii muran uu ka yimaado, waxaa si wayn laguugu dhiiri gelinayaa inaad kala shaqayso shaqaalaha dugsiga xalinta wixii ismaan dhaaf ah ee idin dhex mara. Waxa aad ka dalban kartaa dugsiga ikhtiyaaraadka xalinta muranka ee ay siiso waalidka. TEA waxay bixiyaa afar ikhtiyaar oo rasmi ah oo lagu xaliyo is afgaranwaaga waxbarashada gaarka ah: fududaynta IEP ee gobolka, adeegyada dhexdhexaadinta, nidaamka xalinta cabashada waxbarashada gaarka ah, iyo barnaamijka dhagaysiga hannaanka xaqsoorka.

Macluumaadka ku saabsan ikhtiyaarada xalinta is afgaranwaaga TEA waxaa laga heli karaa *Wargelinta Nidaamka Ilaalinta*. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa websaytka TEA iyo URL soo socda: https://tea.texas.gov/Academics/Special_Student_Populations/Special_Education/Dispute_Resolution/Special_Education_Dispute_Resolution_Processes/.

## Kaalmo Dheeraad ah

Wixii waraaqaha dhamayskatiran ee qeexdimaha xarfaha lasoo gaagaabiyey ee waraaqahan, booqo http://fw.escapps.net/display/Webforms/ESC-FW-Glossary.aspx?DT=G&LID=en.
Nuqulada waraaqahan waxaa sidoo kale laga heli karaa iyada ku qoran 15 luuqadood wax ka badan websaytka SPEDTex https://www.spedtex.org/index.cfm/parent-resources/parents-guide-to-the-ard-process/. Waxa aad sidoo kale ka dalban kartaa nuqul la-taliyaha dugsiga ama waaxda waxbarashada gaarka ah ee dugsiga.